Somali
Soomaali

Hagaha ardada dhamaynaysa VCE-ga imtixaanada qoran ee 2021.

Waxaa waajiba inaad akhrido macluumaadka soo socda oo uu la socda talada imtixaanada qoran oo ka kooban 2021 VCE Exams Navigator. Fadlan aad uga fiirso qaybaha la xiriira Qalabka la ansixiyey iyo aallada qiimaynta dibada ee VCEs, Shuruucda VCAA, 2021 VCE jadwalka imtixaanaadka iyo Bixin khaas ah.

Walow loogu talagalay macluumaadka ardada, waxaa kaloo loo bixiyaa in uu xaqiijiyo in qoysaska/daryeellayaashu ay la socdaan habka lagu diyaarinayo si loo xaqiijiyo qiimaynta laguna sameeyo bay'ad Amaan ka ah Covid (COVIDSafe).

Iyada oo imtixaanka qoran ee VCE uu cayaaro door muhiima go'aan ka gaarida natiijooyinka ugu dambeeya ee VCE, haddii aadan awoodin inaad buuxiso imtixaanada qoran sababtuna tahay tahay COVID-19, waxaad awoodi doontaa inaad dalbato Derejada Imtixaanka la soo-minguuriyey {Derived Examination Score (DES)}.

DES waxaa lagu xisaabiyaa iyada oo la isticmaalayo qiimayn ku salaysan dugsiga oo la isu miisaamay, qiimayn dibada ka ah waxbarashada, natiijooyinkaaga General Achievement Test (GAT), macluumaad siyaada ah oo uu bixiyey dugsigaagu.

VCAA waa isku dubariday si loo xaqiijiyo inaad hesho natiijooyin lagu tashan karo oo xaq ah.

Waxaa waajib kugu ah inaad xaqiijiso in dugsigaagu ku siiyey kuwaan soo socda: waa inaad xaqiijisaa in dugsigaagu uu ku siiyey kuwaan soo socda:

- Koobi shakhsiyeed oo **Jadwalka Qiimaynta/Imtixaanka Ardayga** oo muujinaya taariikhda, waqtiga iyo goobta imtixaanada walba, iyo weliba taariikhaha ugu dambeeya oo la soo qadimayo dalabka DES ee Imtixaan walba; meesha uu khusayso
- Koobigaaga Xaashida Wargelinta ee **Qorshaha Imtixaanka Khaaska ah ee imtixaan** walba kaas oo VCAA ay ansixisay Qabanqaabinta Imtixaan Rasmi ah.

Waa maxay cabirka shaqaynaya si uu u ahaado Imtixaanka VCE mid ka nabdoon COVIDSafe?

Imtixaanada qoran ee VCE waxaa lagu haynayaa dugsigaaga ama goob kale sida uu ku taliyey bixiyaha waxbarashadaada. Dhamaan dugsiyada Fiktooriya iyo kuwa bixiya waxbarashada dugsiyada Sarre waxaa looga baahan yahay inay leeyihiin Qorshe COVIDSafe oo shaqaynaya.

Qorshayaal amaan oo kala duwan oo ay samaysay Wasaarada Caafimaadka (Department of Health) ayaa la diyaarin doonaa si loo xaqiijiyo in bay'ada imitixaanka COVIDSafe ee samaqabka ardada, kormeerayaasha iyo shaqaalaha dugsiga. Talaabooyinkaan amaanka waxaa ka mid ah:

- Habka isdiiwaangelinta marka la yimaado;
- Habaynta goobta si kaalmaynaysa shuruudaha kala fogaanta, ilaalinta shuruudaha laga rabo arday walba oo ah ardaygii walba 4 mitir oo isku wareeg ah; iyo

© VCAA

- Fayadhowrida miisaska iyo kuraasta ka hor iyo ka dib imtixaanka, iyo weliba meelaha aad loo taabto maalinta oo dhan.

Maxaan samaynayaa si aan u ahaado COVIDSafe?

Waxaa waajib kugu ah:

- Qaadashada maaskiga doobalaya sankaaga iyo afkaaga, kaas oo la jaanqaadaya shuruudaha dugsiyada Fiktooriya, haddii aadan haysan ka-dhaafid iin ama xaallad caafimaad darteed. Waxaa waajib kugu ah inaad mar walba qabto maaskiga wajigaaga, waqtigaas oo uu ku jiro markaad timaado, inta imtixaanku socdo, iyo markaad baxayso.
- Joogto gacmahaaga u dhaq, lagu daray markaad gelayso, ama ka baxayso; iyo
- Ilaalinta kala-fogaanshaha, had iyo jeer ugu yaraan ka fogaanshaha 1.5 mitir dadka kaleeto.

Maxaan samaynayaa haddii aan leeyahay iin, jiro ama xaallada kale oo iga dhigaysa mid u nugul COVID-19?

Haddii aad qabto iin, iinta ama xaalladaha kale kuwaas oo kaa dhigaya inay u badan tahay inaad u jirato COVID-19, waxaa waajiba inaad kala hadasho dugsigaaga Qabanqaabo Khaasa oo Imtixaanka. Tani waxay kuu ogolaan kartaa inaad u fadhiisato Imtixaan qoran goob cidla ah oo dugsiga ku taalla taas oo leh meel ku haboon amaanka iyo caafimaadka.

Maxaan samaynayaa haddii aanan fiicnayn asbuuca, ama maalinta Imtixaanka?

Waxaa **waajiba in aadan** imtixaanka tegin haddii aad dareento ladnaansho la'aan ama qabto astaamaha COVID-19, si kasta ha u sahlanaatee, kuwaas waa inay ay ku jiraan:

- lumitaanka ama isbedel dareenka urka iyo dhadhanka;
- qandho, qabow ama dhidid;
- qufac, cuna-xanuun ama sanka oo biya kaa socdaan;
- neefta oo kugu yar; iyo gabaabsi neefeed; iyo
- xaalladaha qaarkood madax xanuun, muruqyo xanuun, yaqyaqsi, hunqaaco, iyo shuban ayaa iyagana loo arki karaa astaamo.

La xiriir dugsigaaga wixii tala siyaada ah haddaad leedahay astaamahaan midkood. Iska baar COVID-19 sida ugu dhaqsaha badan gurigana joog inta natiijadu imanayso. U sheeg goobta baarista ama qaadayaasha inaad tahay arday VCE ah, maadaama ardada VCE la siinayo mudnaan si loogu ogolaado natiijada ugu dhow oo suurtagalka ah.

Waxa waajiba inaad guriga joogto haddii aad sugayso natiijo la xiriirta baaritaanka **astaamaha** COVID-19.

Haddii aad muujiso mid ka mid astaamaha COVID-19 markaad timaado ama haddaad noqoto qof jiran inta lagu baarayo, waxaa lagaa codsan doonaa inaad ku sugto meel mucayina ama waxaa loo yeeri doonaa waalid ama daryeelle si uu kuu qaado.

Haddii aad la ildaran tahay astaamaha COVID-19 maalinta imtixaanka, waxaa waajiba in aadan imaan imtixaanka.

Waxaa waajiba inaad isbaarto gurigana joogto ilaa aad ka hesho natiijooyinka. Haddii aadan awoodin inaad timaado imtixaanka, waxaad xaq u leedahay inaad dalbato DES.

Inaad u timaado imtixaan qoran oo ah VCE, waxaad ta'kiidinaysaa in aadan qabin astaama joogto ah oo COVID-19.

© VCAA

Waa maxay xaaladaha kale oo aanan u iman karin imtixaanka?

Marka lagu daro dareenka ladnaan la'aanta maalinta imtixaanka, waxaa waajib ah in aadan tegin imtixaanka qoran haddii lagaa hellay COVID-19 ama haddii aad sugayso natiijada leh astaamaha COVID-19. Xaalladahaan, waxaad xaq u yeellan kartaa inaad dalbato DES.

Maxaa dhacaya haddii la igu sheegay in qof qaba cudurka aan ku dhowaa {(Primary Close Contact (PCC)}?

Wasaarada Caafimaadka (Department of Health) ayaa ta'kiidisay in ardayga lagu sheegay inuu u dhowaa qof qaba (Primary Close Contact) waxay awoodi doonaan inay u fariistaan imtixaanada iyaga oo fariisanaya qol dugsigoodu u asteeyey.

Haddii lagugu sheegay qof u dhow qof qaba (Primary Close Contact), waxaad u baahan doontaa inaad raacdo awaamiirta Wasaarada Caafimaadka (Department of Health) dugsigaaga ayaana kula xiriiri doona si uu u xaqiijiyo inaad fahamto qorshaha ay waajibka tahay inaad raacdo oo ay ku jiraan:

- Shuruudaha baarista karantiinka iyo COVID-19 haddii si buuxda loo talaalay ama aan si buuxda loo talaalin; iyo
- safarka iyo caafimaadka iyo shuruudaha amaanka oo maalin walba ah oo aad leedahay imtixaan qoraalla.

Caddayn noocee ah Ayaan u baahnahay si aan u dalbado DES sababta COVID-19 darteed.

Waxaad mudnaan doontaa inaad dalbato DES haddii laguu diido dhamaystirka imtixaanka ama ay si aad ah u saamaysay hawshaada COVID-19 darteed.

Caddaynta loo baahan yahay waxaa ka mid ah:

- warqada kaalmaynta/warbixinta dhacdada dugsiga; iyo
- caddaynta baarista COVID-19 sida shahaadada caafimaadka uu bixisay mihnadle caafimaad oo madax banaan oo ku talinaya baaris.

Xiritaanka dugsiga COVID-19 darteed

Haddii dugsigaaga la xiro sababa COVID-19 la xiriira kuwaas darteedna aan la samayn hal imtixaan ama ka badan, dugsigaaga shaqadiisa VCAA si loo xaqiijiyo adiga khasaaro kuuguma jirto. Maaha inaad dalbato DES haddii taasi dhacdo.

Annigu maxaan helayaa kaalmo caafimaad iyo mid dhimirka?

Dareemida walaaca guud iyo welwelka ayaad jiri kara adiga iyo qoyskaaga inta lagu jiro mudada qiimaynta dibada ah ee VCE. Qaarkiin ayaa laga yaabaa inaad ka heshaan dhiirigelin dareenkaan, kuwa kale ayaase laga yaabaa inay u baahan yihiin kaalmo siyaada ah, qoyska, saaxiibada, macalin la aamini karo ama mihnadlayaal caafimaad oo maskaxda ah.

Haddii aad horay uga shaqaysay mihnad caafimaad ama caafimaadka dhimirka, hadda waxaa laga yabaa inay tahay waqti fiican 'eegid' si loo cusboonaysiiyo istaraatiijiyada si firfircoona loogu maareeyo wixii dareen ah oo laga yaabo adiga, qoyskaaga, saaxiibada ama dugsiga inay haysato.

Waxaa jira kaalmooyin kala duwan oo la heli karo:

- Agabka Caafimaadka Dhimirka (Mental health toolkit) (education.vic.gov.au)
- https://www.education.vic.gov.au/Documents/school/teachers/health/mentalhealth/quick-guide-to-student-mental-health-and-wellbeing-resources.pdf

© VCAA

Waa maxay sida kale oo aan ahaan karaa qiimayntayda ka hor?

Dhamaan dadka reer Fiktooriya oo jira 12 sanadood ama ka weyn ayaa hadda mudan inay hellaan talaalka COVID-19 (eligible to receive a COVID-19 vaccine). Inaad istalaasho ayaa ah sida ugu fiican oo aad ku xafidi karto naftaada, qoyskaaga iyo bulshada dugsiga inuu sii fido COVID-19.

Talaalku khasab maaha imtixaanada, laakiin si adag ayaa la isugu dhiirigelinayaa marka laga saaro halka dhakhtarkaagu kugula taliyey inaad joogto. Fadlan la hadal dhakhtarkaaga haddii aad qabto wax su'aalla iyo xaalladaada caafimaad ee shakhsiyeed.

Dhamaan ardada waxaa lagu dhiirigeliyey inay samaystaan ballanta talaalkooda ugu horreeya ka hor inta imtixaankooda. Waxaa lagu talinayaa in aadan qaadan talaalka maalinta imtixaanka ka horraysa – si aad uga fogaato dareenka hargabka sahlan sida daal, madax xanuun, muruqya xannuun, qandho iyo dhaxan iyo/ama xanuun kugu dhaca inta imtixaanka lagu jiro.

Macluumaad intaas ka badan, booqo websaytka Wasaarada Caafimaadka: MacluumaadkaTalalka Carruurta koran |Coronavirus Victoria. Kan waxaa ku jira macluumaad la tarjumay: (Vaccination information for children and teenagers | Coronavirus Victoria). Kan waxaa ku jira macluumaad la tarjumay: Translated information about COVID-19 vaccines | Coronavirus Victoria).

Waxaa lagugu dhiirigeliyey inaad noqoto COVID-Safe sida ugu dhaqsaha badan iyo asbuucyada ku dhow imtixaanka qoran, si looga fogaado inuu kugu dhaco COVID-19. Kan waxaa ka mid ah ka fogaanta meelaha dadku ku badan yahay sida goobaha basaska, ama gaadiidka dadweynaha haddii laga maarmi karo.

Waalidiinta iyo daryeelayaashu maxay macluumaad helli karaan?

Waxay noqon kartaa waqtiyada qaarkood in waalidku ogaado sida ugu fiican oo lagu kaalmeeyo carruurtooda. Macluumaadka waalidka iyo daryeellayaasha waxaa ka mid ah:

- Tips for parents to support their child's health and wellbeing. (Tusaalaayaasha waalidiinta ee caafimaadka iyo samaqabka carruurtooda.)
- Raising Learners Podcast Series. (Kor u qaadida gudbinta Taxanaha ee bartaha)

Xaggee ka helli karaa macluumaad intaas ka badan?

Talo caafimaad oo intaas ka badan la xiriir Khadka COVID-19 ee 24ka saacadood oo ah 1800 675 398, dhakhtarkaaga guud ama booqo websaytka Wasaarada Caafimaadka (Department of Health):

https://www.dhhs.vic.gov.au/victorian-public-coronavirus-disease-covid-19#what-are-the-symptoms-of-coronavirus-covid-19

© VCAA